

# Talooyinka ka hortagga cudurka xilliga Ramadaanta

Ramadaan mubarak! Maanta, salaasaha 13. Abriil waxa bilaabmay ramadaan, isla markaana muslimiin badan ayaa bilaabaya soon. Maqaalkan waxa ku jira ciwaanka talooyin wacan oo ku saabsan ka hortagga qaadista cudurka, lana socdaan macluumaad ku saabsan tallaalka.

Waxannu ognahay in ay caado tahay in ehelka iyo axsaabtu isu yimaadaan xilli-cibaadeedka iyo ciidaha. Naasiibdarro arrintaas ma la samayn karo sannadkan. Ma la oggola in ay guriga yimaadaan wax badan labo marti ah.

Haddii la kulmayo waa in loo kulmo qaab dhijitaal ah. Sidaas oo kale ayaa khuseysa xataa qabanqaabooyinka kale.

Waa muhiim in dadka oo dhan ku dhaqmaan talooyinka ka hortagga is-qaadsiinta cudurka iyo xeerarka jira si ay dhammaan dadka xusaya ramadaanta u helaan xilli-cibaadeed ammaan ah oo wacan, iyo si aynaan u noqon kuwo kordhiyey faafitaanka cudurka.

## Ramadaanta iyo tallaalka

Shabakada Is-Faham ee Muslimiinta iyo Golaha Islaamka Norway waxa ay cadaynayaan in la qaadan karo tallaalka xilliga la sooman yahay, markaa dhammaan dadka waqtiyada soo socda fursad loo siiyo in ay qaataan tallaalka si caadi ah ayey u soo qaadan karaan tallaalka.

Machadka Caafimaadka Dadweynuhu waxa uu soo ururiyey talooyinka ka hortagga cudurka ee loogu talagalay ramadaanta oo ku jira halkan:

<https://www.fhi.no/nyheter/2021/smittevernrad-for-ramadan/>

Vi ønsker alle muslimer i Kristiansand en fredelig og trygg ramadan.

Waxannu dhammaan muslimiinta deggan Kristiansand u rajaynaynaa ramadaan nabad ah oo sugan.